



Talooyin loogu talagalay waalidiinta iyo qoysaska codsanaya taageero dhaqaale.

Ku socota waalidiinta ardayda ay dhaleeni sanadkii u dambeeyay dhigtaan dugsiga sare: Ma aha waqtii dambe in la codsado taageerada dhaqaale ee loogu talagalay kulliyadda ee sanad dugsiyeed soo socda ee 2019-2020 iyada oo la buuxinayo Codsi Lacag la'aan ah oo loogu talagalay Taageerada Dhaqaale ee Federaalka, oo sida caadiga ah loo yaqaan FAFSA. Abaalmarinnada ka socda FAFSA waa mid kaliya ku saleysan dakhliga, iyada oo ardayda u qalantaa ay heli doona lacago deeq ah, deyn iyo/ama abaalmarinnada lagu helo shaqada la shaqeeyo inta dugsiga la aadayo 'work study'.

Haddii aan codsan weli waxaad haysataa waqtii aad ku buuxiso FAFSA/ORSAA aad leedahay. (ORSAA waa Codsiga Taageerada Ardayga ee Oregon oo loogu talagalay ardayda aan sharciga lahayn ama haysta DACA.) Meel wanaagsan oo lala xiriiro waa la-taliyaha ardaygaaga ee dugsiga sare, oo kaa caawin kara buuxinta codsiga FAFSA. Sidoo kale, dhowr dugai ayaa martigelinaya hawlahaa la xiriira taageerada dhaqaale oo ardayda iyo qoysasku ay ka soo qayb gali karaan si ay buuxiyaan codsigooda isla markaana wixii su'aalo ah looga jawaabo.

Macluumaadka aad u baahan tahay si aad u buuxiso FAFSA aad leedahay

1. Lambarka Social Security-gaaga
2. Lambarkaaga Diiwaan gelinta Ajnabi (haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah)
3. Canshuur celinta dakhliga federaalka, W-2, diiwaannada kale ee lacagta la helo.
(Ogow: Waxaa suurtagal ah in aad awoodo in aad macluumaadkaada canshuur celinta dakhliga federaalka u wareejiso FAFSA adiga oo isticmaalaya Qalabka Xogta Lagula Soo Baxo ee IRS.)
4. Warbixinada bangiga iyo diiwaannada dhanka maalgelinta (haddii ay jiraan)
5. Diiwaannada dakhliga aan canshuurta laga qaadin (haddii ay jiraan)
6. Aqoonsig FSA si aad si elektaroonik ahaan wax ugu saxiixdo.

Macluumaadka aad u baahan si aad ku buuxiso ORSAA aad leedahay

1. Taariikhda dhalasho ee ardayga iyo waalidka(iinta)
2. Canshuur celinta dakhliga federaalka, W-2, diiwaannada kale ee lacagta la helo.
(Ogow: Waxaa suurtagal ah in aad awoodo in aad macluumaadkaada canshuur celinta dakhliga federaalka u wareejiso FAFSA adiga oo isticmaalaya Qalabka Xogta Lagula Soo Baxo ee IRS.)
3. Warbixinada bangiga iyo diiwaannada dhanka maalgelinta (haddii ay jiraan)
4. Diiwaannada dakhliga aan canshuurta laga qaadin (haddii ay jiraan)
5. Lambarka ruqsadda baabuurka lagu wado (haddii aad mid leedahay)

Hawlahaa soo socda ee FAFSA/ORSAA ee ka dhacaya dugsiyada sare:

- **Franklin:** Khamiista, Febraayo 7 iyo Khamiista, Febraayo 21; oo labada maalmoodba yihiiin 9-11 subaxnimo kana dhacayo Xarunta Kulliyadda & Xirfadda.
- **Roosevelt:** Khabiirada FAFSA/ORSAA ayaa la helayaa maalmaha Isniinta 3 galabnimo, maalmaha Jimcaha 9-11 subaxnimo kana dhacayo xafiiska la-talinta.
- **Grant:** Khamiista, Febraayo 14, 9:50-11:30 subaxnimo
- **Dugsiga Sare ee Reynolds (oo u furan qoysaska PPS):** Arbacada, Febraayo 13, 5-7 galabnimo; Arbacada, Maarsa 13, 5-7 galabnimo.

Qoysaska aan weli soo xareynin canshuurtooda isla markaana dakhliga qoyskooda ee 2018 uu ka yar yahay \$66,000 si lacag la'aan ayay uga xareysan karaan internet-ka, ama adiga oo booqanaya website-ka canshuurta oo lacag la'aan ah oo leh tabarucayaal ay IRS-aqoonsan tahay. Booqo Cashoregon.org wixii macluuumaad dheeraad ah.